

Warbixin kooban ku saabsan dugsiyada sare ee dalka Iswiidan



Skolverket

Cabbirka shahaadooyinka

Calaalamaha cabbirka shahaadooyinka waa xarfaha A-F, taasoo xarfka A ah shahaadada ugu sareeyso, xarfka E waa shahaadada lagu guulaysto ee ugu hooseeyso. Xarfka F waa kuma guulaysan. Ardayga waxaa shahaado la siiyaa kadib markii koorso kasta u dhamaysto. Cabbirka shahaadooyinka shuruuda aqoonta ee heer-qarmedka ahi waa E, C iyo A.

Hab-dhiska barnaamijyada

Maadooyinka dugsiyada sare ay ka wada siman yihiin waa maadooyin dhammaan ardayda dugsiyada sare ay bartaan. Kuwaasoo ah af-ingriisi, taariikh, isboortiga iyo caafimaadka, xisaabta, aqoonta abuurka, aqoonta diinta, aqoonta bulshada iyo af-iswiidishka ama af-iswiidishka luqad labaad ahaan. Ardayda wuxuu maadooyin dugsiya sare ay ka wada siman yihiin u bartaa siyaabo kala duwan hadba barnaamijka waxbarashada.

Maadooyinka dugsiyada sare laga wada siman yahay ka sokkoow, barnaamij kasta wuxuu lee yahay tiro maadooyinka barnaamijyada ay ka wada siman yihiin, kuwaasoo ardayda dhammaantood barnaamijka gaareedka awgiis u akhristaan. Taasoo barnaamijka u yeeleyso astammo u gaar ah.

Dhammaan barnaamijyada, laakinse ka reeban barnaamijka daryeelka iyo xanna- andda, waxay leeyihiin jiho kala duwan, taasoo ardayga kala dooran karo. Teeda kale, barnaamij kasta wuxuu leeyahay koorsooyinka kala duwan loogu talagalay qoto dheerida barnaamijka. Waxbarashada waxay leedahay doorasho shaqsiyeed.

Doorasho shaqsiyeedka barnaamij-xirfadeedka, dugsiya waa in laga hela koorsooyinka looga baahan yahay saldhigga u qalmidda waxbarasho jaamaceed. Dhammaan barnaamij waa in ardayda ay helaan fursad ay ku akhristaan ugu yaraan hal maaddo quruxda iyo ugu yaraan hal koorso isboortiga iyo caafimaadka katirsan doorasho shaqsiyeedka.

Dhammaan waxbarashada barnaamijyada waxaa leeyihiin hawlgalka dugsig sare, oo ka kooban waxbarashada barnaamijka. Hawlgalka dugsiya sare waa in lagu guulaysta sida ardayga uu shahaado ku helo awgeed.

Laba nooc oo shahaado ah

Ardayga dhamaystay barnaamijka dugsiga sare wuxuu heli karaa shahaadada dugsiga sare.

Shahaadada xirfada waa in ardayga uu akhristay 2500 dhibcood, kuna guulaysto 2250 iyaga kamid ah. Arday waa in uu ku guulaystaa af-iswiidishka 1, ama af-iswiidishka luqad labaad ahaan. 1, af-ingriisi 5 iyo xisaabta 1. Shuruuda kale waxaa weeyaan in ardayka u ku guuleysto helida 400 dhibcood oo ah barnaamij maadooyin wadajir iyo hal guulaysasho hawlgalka dugsia sare. Ardayga wuxuu heli karaa shahaadada xirfada waxbarasho barbaradka iyo waxbarasho xirfadda ku salaysan goob dugsiiyeed.

Barnaamij u diyaargarooowga waxbarasho jaamaceed waa in ardayga u dhigtaa 2500 dhibcood kuna guulaystaa 2250 dhibcood iyaga kamid ah. Ardayga waa in uu ku guulaystaa af-iswiidishka 1, 2 ama 3 af-iswiidishka luqad labaad ahaan. 1, 2 iyo 3, af-ingriisi 5 iyo 6 xisaabta 1. Teeda kale waa in ardaygu u ku guulaysta hawlgalka dugsia sare.

Shahaadada u diyaargarooowga waxbarasho jaamaceed waa saldhiga waxbarasho jaamaceedka lagu helo.

Warbixin dheeraad ku saabsan u qalmida waxbarasho jaamaceed ka akhriso HYPERLINK ”<http://www.skolverket.se>” www.skolverket.se goobta Förskola & skola. Kadib waxbarashada dugsiga sare .

Shahaada xirfada iyo ku guulaysashada helida shahaado af-iswiidishka 2 ama 3 af-iswiidishka luqad labaad ahaan. 2 iyo 3 af-ingriisi 6 waa saldhigga u qalmidda waxbarasho jaamaceedka lagu helo.

Dhammaan ardayda dhigato barnaamij-xirfadeed waxay xaq ku leeyihiin dhigashada koorsooyinka u gogolxaarayo helida saldhigga u qalmidda waxbarasho jaamaceed.

Saldhigga u qalmidda waxbarasho jaamaceed k sokkoow, waa in ardaygu uu ku guulaystay helida shahaadooyinka koorsooyinka muhimid gaarka u leh codsashada waxbarasho la doonaayo, taasoo loo yaqaanno särskild behörighet u qalmid gaar ah.

Ardayga aan ku guulaysan helida shuruuda imtixaanaka dugsiga sare, ma heli karo caddaynta shahaadada, ee wuxuu heli karaa caddynta waxbarashada.

Ganacsi aasaasidda

Ganacsi aasaasidda waa in waxbarashada dugsiyada sare aysan ka maqnayn. Dhammaan barnaamij waxay ardayda helayaan fursad ay ku qoto dheeraan barashada ganacsi aasaasidda.

Yurub ka tirsan

Af-iswiidishka dugsiyada sare laga barto wuxuu kugu xirayaa habdhiska u qalmida qaarada Yurub. Ujeedada waxay tahay sare u qaadka dhaqdhaqaaqida muwaatinyiinta iyo fududaynta waxbarashada aan dhamaadka lahayn.

Waxbarashada dadka waawayn

Waxbarashada dadka waawayn waa in uu adeegsada qorsheynta maadooyinka iyo shurruda aqoonta ee dugsiyada sare. Isla markiina waa in waxbarasho dadka waawayn noqotoa mid isbed bedli karto, loona qabsiyaa baahida ardayga waawaayn.

Sideed iyo tobanka barnaamij

Barnaamij-xirfadeed

- Barnaamijka carruurta iyo wakhtilummiska (Barn- och fritidsprogrammet)
- Barnaamijka dhismaha iwm (Bygg- och anläggningsprogrammet)
- Barnaamijka korontada iyo tamarta (El- och energiprogrammet)
- Barnaamijka gaadiidka iyo is-gaarsiinta (Fordons- och transportprogrammet)
- Barnaamijka ganacsiga iyo maamulka (Handels- och administrationsprogrammet)
- Barnaamijka farsamada (Hantverksprogrammet)
- Barnaamijka hoteelada iyo dalxiiska (Hotell- och turismprogrammet)
- Barnaamijka farsamada warshadaha (Industri tekniska programmet)
- Barnaamijka adeegsashada dabiiciga (Naturbruksprogrammet)
- Barnaamijka makhaayadaha iyo raashinka (Restaurang- och livsmedelsprogrammet)
- Barnaamijka biyaha iyo hanti ma guurtada (VVS- och fastighetsprogrammet)
- Barnaamijka daryeelka iyo xannaanadda (Vård- och omsorgsprogrammet)
- Barnaamijka u diyaargarowga waxbarasho jaamaceed (Högskoleförberedande program)
- Barnaamijka aqoonta dhaqaalaha (Ekonomiprogrammet)
- Barnaamijka aqoonta quruuxda (Estetiska programmet)
- Barnaamijka barashada adabka aadanaha (Humanistiska programmet)
- Barnaamijka barashada aqoonta dabecada (Naturvetenskapsprogrammet)
- Barnaamijka barashada aqoonta bulshada (Samhällsvetenskapsprogrammet)
- Barnaamijka farsamada (Teknikprogrammet)
- Barnaamijka u diyaargarowga waxbarasho jaamaceed
- Barnaamijka aqoonta dhaqaalaha (Ekonomiprogrammet)
- Barnaamijka aqoonta quruuxda (Estetiska programmet)
- Barnaamijka barashada adabka aadanaha (Humanistiska programmet)
- Barnaamijka barashada aqoonta dabecada (Naturvetenskapsprogrammet)
- Barnaamijka barashada aqoonta bulshada (Samhällsvetenskapsprogrammet)
- Barnaamijka farsamada (Teknikprogrammet)

Barnaamijka horudhaca (Introduktionsprogram)

Shanta barnaamij ee horudhaca ah, waxay ardayda u qalmida haysan siinayaan fursado cusub. Iyadoo barnaamijka adeegsanaayo ayay heli karaan u qalmida barnaamij-qarmeedka, isku diyaarinta suuqa shaqada ama waxbarasho kale u gudbin karaan.

Barnaamij-xirfadeed

- Shanta barnaamij ee horudhaca ahi waxaa weeyaan
- Isku diyaar garaynta waxbarashada (Preparandutbildning)
- Doorosho shaqsiyeedka barnaamijka ku salaysan (Programinriktat individuellt val)
- Horudhaca barashada xirfadda (Yrkesintroduktion)
- Ku beddel shaqsiyeedka (Individuellt alternativ)
- Horudhaca luqadda (Språkinntroduktion)



ISBN: 978-91-86529-79-6
Grafisk form: AB Typoform
Omslagsfoto: Michael McLain
Foto inlaga: Michael McLain

Skolverket